



OFFICE OF ARTS & CULTURE  
CITY OF SEATTLE

## Tilmaamaha Xarunta Fanaaniinta ee 2023-2024

### ***Tusmada ( Guji/Tiksii khiyaarka hoose si'aad u tagto qaybtaas)***

1. [Dulmarka Deeqaha](#)
  - a. [Ujeedada Deeqda](#)
  - b. [U-qalmitaanka/Shuruudaha](#)
  - c. [Maalgelinta](#)
  - d. [Shuruudaha Qiimeynta](#)
  - e. [Jadwalka waqtiga](#)
2. [Tilmaamaha Codsiga & Qaybaha](#)

### ***Dulmarka Deeqaha***

Xarunta Fanaaniinta waa wada shaqayn sanado badan socota una dhaxeysa [Seattle Office of Arts & Culture](#) (Xafiiska Fanka Seattle & Dhaqan) iyo [Seattle Center](#) (Xarunta Seattle), oo taageero ka helaya [Uptown Arts & Culture Coalition](#) (Iskaashatada Dhaqanka iyo Fanka ee Aptown) iyo jaaliyadaha ku teedsam Xarunta Seattle. Mashruucan waxaa suurtageliyay deeq faa'iido bulsho oo 10 sano ah oo ka timid ([Climate Pledge Arena](#) iyo Seattle Kraken, bilowgii 2021).

[Fanaaniinta Xarunta](#) Waxay maalgelisaa fanaaniinta, kooxaha, iyo ururada si ay u horumariyaan una soo bandhigaan bandhigyo soo baxay sanadka oo dhan. Bandhigyadu waxay dhacaan inta u dhaxeysa Octoobar 2023 iyo Sebteembar 2024. Ka qaybgalayaasha la xushay waxay heli doonaan mid ka mid ah \$2,000, \$4,000, ama \$6,000 maalgelinta ku salaysan fannaaniinta/kooxda cabbirka iyo kakanaanta baaxadda. Abaalmarinnada xilliga hadda jira (2022-2023) uma qalmaan inay codsadaan xilli ciyaareedka 2023-2024.

**Macluumaadka:** Fadlan u dhugyeelo [Su'aalahan Badanaa La is waydiiyo](#), ama la xiriir Alex Rose, Maareeyaha Baarmaanijka Xarunta Fanaaniinta, (206) 459-6517 ama [alex.rose@seattle.gov](mailto:alex.rose@seattle.gov).

|                                                                                  |                                         |
|----------------------------------------------------------------------------------|-----------------------------------------|
| <b>Codsiga</b>                                                                   | <b>Furitaanka</b>                       |
| Codsiga waxaa lagu soo gudbiyaa Khad Onleyn. Codsiga waxaa laga heli karaa bogga | Talaado, Maay 16, 2023, 10 AM (Pacific) |

|                                                                                                                                                                                                                                                              |                                                                                                                                                                                                          |
|--------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------|----------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------|
| <p>deeqda ee Magaalada Seattle ee FLUXX<br/> <a href="https://seattle.fluxx.io/user_sessions/new">https://seattle.fluxx.io/user_sessions/new</a></p> <p>Hadii aadan heysan kumbuyuutar ama khad internet, la xiriir shaqaalaha sida ugu dhakhsaha badan.</p> | <p><b>Taariikhda ugu danbeysa</b><br/> Talaado, Juun 27, 2023, 5PM (Pacific)</p>                                                                                                                         |
| <p><b>Kulamada Macluumaadka:</b><br/> <b>Hel dulmar guud oo ku saabsan barnaamijka iyo sida loo soo gudbiyo codsiga ugu fiican.</b></p>                                                                                                                      |                                                                                                                                                                                                          |
| <p><b>Macluumaadka Kulanka 1aad (mid isku jira)</b><br/> Khamiis, Juun 1, 1-2 p.m.<br/> Qof Ahaan: Seattle Center Armory<br/> Fogaan Arag (Maqal iyo Muuqaal):Webex<br/> <a href="#">JAWAAB-CELIN</a></p>                                                    | <p><b>Macluumaadka Kulanka 2aad (mid isku jira)</b><br/> Sabti, Juun 17, 10-11am.<br/> Qof Ahaan: Seattle Center Armory<br/> Fogaan Arag (Maqal iyo Muuqaal):Webex<br/> <a href="#">JAWAAB-CELIN</a></p> |

### Wixii gargaar ah, La xiriir:

- **Codsiga ama helitaanka adeeg** :Laxiriir Alex Rose, Maareeyaha Barmaaniijka Fanaaniinta ee Xarunta, (206) 459-6517 amaa [alex.rose@seattle.gov](mailto:alex.rose@seattle.gov)
- **Taageerada Farsameed Xaga Onleynka** :La Xiriir Marshonne Walke Kalaaliye, [marshonne.walker@seattle.gov](mailto:marshonne.walker@seattle.gov)
- **Waxaan haynaa tarjubaano kugula hadli kara luqadaada, oo ay ku jiraan Luqadda Calaamadaha Ameerikaanka.** Nasoo wac oo noo sheega luqadaad ku hadasho Filo hakad gaaban inta aanu heleyno tarjumaan si uu ugu biiro wicitaanka.

### **Ujeedada Deeqda**

Fanaaniinta Xarunta waxa loogu talagalay inay taageeraan bulshooyinkeena fanka firfircoon iyaga oo soo bandhigaya fanaaniinta soo koraya iyo kuwa muda jirey ee Xarunta Seattle ee dib loo soo nooleeyay, iyada oo la ballaarinayo fanka iyo waayo-aragnimada dhaqameed ee [Degmada Fanka & Dhaqanka ee Uptown](#), Fanaaniinta la doortay waxay ka tarjumayaan kala duwanaanshaha dhaqameed ee magaalada waxayna haystaan fursad gaar ah oo ay ku qabtaan Xarunta Seattle, ku raaxaystaan taageerada wax soo saarka farsamada, la xiriiraan dhageystayaal cusub, oo soo bandhigaan kartidooda. Soo-

booqdayaasha kambaska iyo agagaarkeeda waxay ka faa'iideeystaan bandhigyo la yaab leh oo xiiso leh sanadka oo dhan.

### **U-qalmitaanka/Shuruudaha**

**Waad u qalantaa** Codso deeqdan hadii aad la kulanto shuruudaha soo socda.

- Waxaad tahay farshaxan shakhsi ah, urur, ama koox jaaliyad ku salaysan, ama si joogto ah uga soo bandhigta shaqada gudaha Seattle.
  - Ururada iyo fanaaniinta shaqsiga ah ee matala bulshooyinka sida aadka ah u saameysey cadaadiska nidaamka oo ay ku jiraan dadka dakhligoodu hooseeyo, dadka naafada ah, bulshooyinka soogalootiga iyo qaxootiga, iyo bulshooyinka midabka leh ayaa lagu dhiirigelinayaa inay codsadaan.
- Waxaad haysataa nambarka Aqoonsiga Canshuuraha ee Federaalka (Lambarka Amniga Bulshada, ITIN, ama Lambarka Aqoonsiga Shaqaalaha) oo ku saleysan, ama aad leedahay barnaamij hadda jira oo firfircoon, ee Magaalada Seattle.
  - Kooxaha codsanaya loogama baahna inay noqdaan 501 (c) (3) aan faa'iido doon ahayn, sidoo kale loogama baahna inay isticmaalaan wakiil maaliyadeed
- Waxaad soo gudbin kartaa hal codsi sannadkiiba barnaamijkan.
- Kuwa qayb ka ah xiliga socda (2022-2023) **maahankuwa u qalma** inay codsadaan xiliga 2023-2024.

**KaagaBandhigyada u qalmain** lagu maalgeliyo deeqdan haddii ay buuxiso shuruudaha soo socda:

- Waxqabadkaagu wuxuu ahaan doonaa bilaash oo u furan dadweynaha.
- Waxaad yeelan doontaa caymis kulan bandhigeed
- Bandhigu wuxuu socod 90 daqiiqo ama ka yar.

### **Maalgelinta**

Lacagaha abaal-marintu waxa loo isticmaali karaa kharashka fannaanka, suuq-geynta iyo khidmadaha xayaysiinta, maaraynta mashruuca iyo kharashaadka shaqaalaha, saadka,

kirooyinka qalabka ama kharashyada kale ee la xiriira wax soo saarka, caymiska loo baahan yahay, iyo waxaan ka badnayn 10% kharashyada cuntada la xiriira. Kharashyo dheeri ah ayaa laga yaabaa in la oggolaado marka hore uu oggolaadey maamulaha mashruuca deeqda.

Codsadayaashu waxay codsan karaan heerarka soo socda ee maalgelinta:

- \$2,000 abaalmarin (sida caadiga ah 1-2 bandhige), oo lagu darey \$600 nooc taageero oo wax-soo-saar ah
- \$4,000 abaalmarin (sida caadiga ah 3-5 bandhige) oo lagu darey \$1,100 nooc taageero oo wax-soo-saar ah
- \$6,000 abaalmarin (sida caadiga ah 3-5 bandhige), oo lagu darey \$1,600 nooc taageero oo wax-soo-saar ah

Deeqdan looma isticmaali karo kuwa soo socda:

- Dhacdooyinka aan la heli karin oo bilaash u ah dadweynaha
- Adeegyada diinta
- Dhacdooyinka ama bandhigyadu kuwaas oo lacag ururintu ay tahay ujeedada koowaad
- Hadyadaha
- Kharashka maamulka ee ururada aan si toos ah ula xiriiraan mashruuca
- libka qalabka ama software

### **Shuruudaha Qiimeynta**

Soo jeedinta la gudbiyay barnaamijka waxaa lagu qiimeyn doonaa shuruudaha soo socda:

- **Horumarka Xirfadeed:** Codsigu wuxuu fursad siinayaa fannaaniinta/kooxdu si ay uga faa'iidaystaan soo-gaarista daawadayaasha cusub, taageerada wax-soo-saarka, iyo soo bandhigida kartidooda gaarka ah ee Seattle Center.
- **Guusha:** Codsaduhu wuxuu muujinayaa waayo-aragnimada ama awoodda korriinka (oo ay ku jirto taageerada la-hawlgalayaasha khibrada leh ama iskaashatooyinka) si loo fuliyo waxqabadka/dhaqdhaqaaqa.

- **Farshaxan:** Codsigu waxa uu soo jeedinayaa waayo-aragnimo faneed/dhaqameed soo jiidasho leh oo dhab ah, kaas oo la jaan qaadi kara dhagaystayaasha la soo jeediyay.
- **Xiriirka Dhaqanka:** Codsiga wuxuu mudnaan siinayaa hal-abuurka dadka madow, Buniga, Dhaladka, Aasiya iyo qurba-joogta, soo-galootiga, qaxootiga, iyo bulshooyinka kale ee aan loo adeegin iyo kuwa aan la daboolin baahidooda.

### **Jadwalka waqtiga**

Jadwalku waa qiyaas waana uu isbadli karaa.

- **May 16, 2023 (10am)**Codsigaa furmaya
- **Juun 27, 2023 (5pm):** Codsigaa xirmaya
- **Luulyo-horaanta Agoosto 2023:**Gudiga dib eegaya
- **Bartamaha Agoosto 2023:** Talooyin ku saabsan maalgelinta ay dib u eegeen hoggaanka FARSHAXANKA.
- **Dhamaadkaa Agoosto 2023:** Codsadayaasha ayaa la ogeysiiyayaa go'aamada maalgelinta
- **Sebteembar 2023:**Tababarka guuleystaha iyo qandaraasyada
- **Oktoobar 2023-Sebteembar 2024:** Farshaxaniistayaasha Bandhig faneedka Xarunta ayaa ka dhacaya

### **Tilmaamaha Codsiga & Qaybaha**

Magaalaadaa Seattle ayaa isticmaala nidaamka codsiga deeqda [FLUXX](#). Haddii aanad sidaas hore u samayn, waxaad u baahan doontaa inaad abuurto arji cusub ka hor intaadan awoodin inaad gasho codsiga.

- **La xiriir/Macluumaadka Kafiilka Maaliyadeed:** Qaybtani waxay ku siinaysaa macluumaad dheeraad ah oo lagala xiriir karo oo gaar u ah codsigan balse aan hore looga codsan astaanta diiwaangelinta.
- **Su'aalaha Codsiga/Macluumaadka Mashruuca:** Ujeedada su'aalahan waa in la wadaago macluumaadka ku saabsan dhacdadaada/mashruucaaga, bulshada ay u adeegto iyo taariikhdaada qaarkood.

1) **Farshaxaniiste/Ururka Boga internetka ama Isku xirka Baraha Bulshada**

- 2) **Qorshe Faneed;** Dooro ah qorshe faneed ee mashruuca aad soo jeedisay
- 3) **Magaca Mashruuca**
- 4) **Mashruuca oo Kooban:** Dhowr jumladood, fadlan ku sharax waxqabadka soo booda ee aad jeceshahay inaad ku soo bandhigto Xarunta Seattle. Maxay noqon doontaa waayo-aragnimada dhagaystayaashu Ku dar dhererka waxqabadka, tirada fannaaniinta, nooca, shaqada cusub ama dib loo rakibay, baahiyaha farsamada, iyo wax kasta oo kale oo aad dareento inay muhiim tahay in la xuso .(Ugu badnaan 500 oo erey)
- 5) **Taariikh:** Si kooban u sharax qofka aad tahay, khibradaada, guulaha muhiimka ah, iyo khibrada soo saarista bandhigyada ama dhacdooyinka, gaar ahaan qorshe faneedka. (Ugu badnaan 250 erey)
- 6) **Xulashada Qaybta Abaalmarinta:** Tilmaan qaybta doorashadaada koowaad, labaad, iyo dambe, taasoo ka tarjumaysa sida ugu habboon ee waxqabadkaaga la soo jeediyay.
  - (1-2 bandhige) Yar: Abaal marin \$2,000, lagu darey \$600 taageero wax-soo-saar.
  - (3-5 bandhige) Dhexe: Abaal marina \$4,000 lagu darey \$1,100 taageero wax soo saar.
  - (6+bandhige) Balaaran: Abaal marin \$6,000 lagu darey \$1,600 taageero wax soo saar
- 7) **Jadwalka Dookhyada:** Tilmaan doorashadaada koowaad, labaad, saddexaad, iyo ugu dambeysa ee sanadka, taasoo ka tarjumaysa helitaankaaga inaad wax qabato.
  - Oktoobar-Dhiseembar 2023
  - Janaayo-Maarsp 2024
  - Abriil-Juun 2024
  - Luulyo-Sebteembar 2024
- **Macluumaadka Dadweynaha:**Kan **dib loo eegi maayo iyadoo qayb ka ah codsigaaga** Taas beddelkeeda waxaa loo isticmaalaa in lagu caawiyo FARSHAXANKA inay wax badan ka bartaan bulshooyinka aan ku gaarno barnaamijyadeena si aan u sii wadno shaqada si'aan uga dhigno barnaamijyadeenna kuwo siman. Jawaabaha waa ikhtiyaari, laakiin codsadayaaashu waa inay soo gudbiyaan su'aalaha jawaabaha ama la'aantood ka hor inta aysan u gudbin codsiga intiisa kale.